# REPUBLIC OF SOMALILAND

## Maxkamadda Dastuurka

**Constitutional Court**

**MS/DD/02/2015** **Date: 18/08/2015**

**Maxkamada Dastuuriga ah ee Jamhuuriyada Somaliland**

**Markii ay aragtay** Qodobka 98aad, Faqradda 1aad[1], Xarafka (b) oo sheegaya in Garsoorku awood u leeyahay fasiraadda macnaha xeerarka kasoo baxa Golayaasha Dastuuriga ah, iyo Xarafka (j) oo ah in uu ka taliyo muran kasta oo la xidhiidha waafaqsanaanta Dastuurka JSL.

**Markay aragtay** Qodobka 15aad[2] ee Xeerka Nidaamka Garsoorka ee JSL**,** Faqradda 1aad, Xarafka (b) oo sheegaya macnaynta iyo fasiraadda Dastuurka iyo xeerarka kale ee dalka lagaga dhaqmo marka la isku qabsado nuxurka ujeeddadooda, iyo Faqradda 11aad[3] oo sheegaysa in Maxkamadda Dastuuriga ahi ka taliso muran kasta oo la xidhiidha waafaqsanaanta Dastuurka oo ay laba dhinac isku hayaan.

**Markay Daristay** Warqada[4] Madaxweynaha JSL ee Lr. JSL/MD/100-3450/082015, kuna saabsanayd Codisaga Fasiraad ee uu ka dalbaday Maxkamada Dastuuriga ah kuna taariikhaysan 08/08/2015.

**Markay Daristay** Go'aanka[5] mudo kordhinta ee Golaha Guurtida JSL ee *Ref/G/G/JSL/Go'aan Lambar 04/05/2015* kuna Taariikhaysan 11/05/2015.

**Markay Daristay** Heshiiska[6] Saddexda Xisbi Qaran ee KULMIYE, WADANI iyo UCID isla markaana uu Madaxweyne Ku Xigeenka JSL Golo joog ka ahaa Kuna Taariikhaysan 27/05/2015

---

[1] Qod 98(1) ee Distoorka:
 '1. Garsoorku waxa uu awood gaar ah u leeyahay:
  b. In uu fasiro micnaha xeerarka ka soo baxa Golayaasha dastuuriga ah iyo xeerarka degdegga ah iyada oo la raacayo Dastuurka.
  t. Inuu ka garsooro khilaafka ka dhex abuurma laamaha Dawladda oo dhinac ah iyo xubno ka tirsan dadweynaha oo dhinac ah ama dadweynaha dhexdooda.
  j. Inuu ka taliyo muran kasta oo Ia xidhiidha waafaqsanaanta Dastuurka.'

[2] Qod. 15(1) ee Xeerka Nidaamak Garsoorka (Xeer Lr. 24/2003):
 '1. Maxkamada dastuuriga ah waxay awood u leedahay :-
  a) dhagaysiga iyo go'aan gaadhista dacwadaha la xidhiidha go'aanada dawlada iyo xeer dejinta ee aan wafaqsanayn dastuurka ee ay soo hor dhigto cida danaynaysaa.
  b) Macnaynta iyo fasilaada dastuurka iyo xeerarka kale ee dalka lagaga dhaqmo marka laysku qabto nuxurka ujeedadooda
  c) Fasiraada iyo wax ka bedelka xukumada Garsoorka ee dastuurka khilaafsan.'

[3] Qod. 15(11) ee Xeerka Nidaamak Garsoorka (Xeer Lr. 24/2003):
 '11. Maxkamada Dastuuriga ahi waxay ka talisaa muran kasta oo la xidhiidha waafaqsanaanta Dastuurka oo ay laba dhinac isku hayaan.'

[4] Eeg Lifaaqa 1aad ee qoraalkan.

[5] Eeg Lifaaqa 2aad ee qoraalkan.

[6] Eeg Lifaaqa 3aad ee qoraalkan.

**MAXKAMADDU WAXAY KU SABABAYSAY QARAARKEEDA ASBAABTAN HOOS KU XUSAN**

- In Madaxweynaha JSL uu dalbaday kaliya in tafsiir lagu sameeyo labada xili doorasho ee ay kala tilmaamayaan Go'aanka Golaha Guuritida iyo Heshiiskii Saddexda Xisbi Qaran.
- In aanu Madaxweynuhu ka dalban Maxkamada fasiraad ku saabsan in Go'aanka muddo kordhinta ee Madaxwaynaha, Madaxweyne Ku Xigeenka iyo Golaha Wakiillada ee Golaha Guurtidu kordhiyas waafaqsan-yahay Dastuurka JSL iyo in kale, isla markaana aanay jirin cid durtay.
- In aanu jirin Heshiis Midaysan oo saddexda Xisbi Qaran u Gudbiyeen Golaha Guurtida intii aanay samaynin Mudo Kordhinta, isla markaana Xisbayada Qaranku ay heshiiskooda, Qodobka 1aad, ku ixtiraameen Go'aankii Golaha Guurtida.
- In Gudida Doorashadu cadeeyeen in aan farsamo ahaan doorashada Madaxweynaha iyo Madaxweyne Ku Xigeenku ku qabsoomayn 26/06/2015.
- In muddo xileedka 5-ta sano ee ay doorashada ku yimaaddaan Madaxweyenaha, Madaxweyne Ku Xigeenka, Golaha Wakiilada iyo muddada uu kordhiyaan Golaha Guurtidu marka ay 5-ta sano ee ay doorashada ku yimaaddeen ay dhammaato, si waafaqsan Qod. 83aad Faqradiisa 5aad[7] iyo Qod. 42aad Faqradiisa 3aad ee Dastuurka JSL, ay leeyihiin ku dhaqan sharci oo isku mid ah
- In Golayaasha Qaranku (Fulinta iyo Xeer dajinta) ay isku mid yihiin awoodooda sharci ee muddo xileedka ay doorasho ku yimaaddaan iyo muddada loo kordhiyo aftidii Dastuurka ee 2001 horteed iyo dabadeedba. Tusaalena waxa ah in Xeer-dajintu iyaga oo ku fadhiya Mudo kordhin ay abuureen Xeerar cusub, ansixiyeen Gudiyo iyo Masuulyiiin Qaran, iwm. Dhinaca kale aftidii dastuurka ee 2001-dii horteed iyo dabadeedba waxa jiray Madaxweynayaal kala duwan oo dalka soo maray saxeexayna Xeerar iyo Mashruucyo sharci si ay u dhaqangalaan, isla markaana magacaabay Masuuliin Qaran iyo Gudiyo, waxa kale oo ay qaateen Go'aano Masiiri ah iyaga oo ku fadhiyay Mudo kordhin.
- In awoodda muddo kordhinta Golayaasha Kala Duwan ee Qaranka Marka ay ka dhamaato muddo xileedka ay doorasho ku yimaaddeen uu leeyahay Golaha Guurtidu si waafaqsan Qod. 83aad Faqradiisa 5aad iyo Qod. 42aad Faqradiisa 3aad[8] ee Dastuurka JSL.

Sidaa darteed Maxkamada Dastuuriga ah JSL waxay soo saartay Qaraarkan:

**<u>QARAARKA FASIRAADDA MAXKAMADDA DASTUURKA</u>**

---

[7] Qod. 83(5) ee Distoorka:

> '5. Haddii ay suurtoobi weydo duruufo Ia xidhiidha nabadgelyada darteed in la qabto doorashada Madaxweynaha iyo Ku-xigeenka Madaxweynaha marka muddadii xilkoodu dhammaato, waxa Golaha Guurtida waajib ku ah in ay muddada xilka u kordhiyaan Madaxweynaha iyo Ku-xigeenka Madaxweynaha, iyaga oo tixgelinaya muddada dhibaatada lagaga gudbi karo; doorashaduna ku qabsoomi karto.'

[8] Qod. 42(3) ee Distoorka:

> '3. Haddii doorashada Golaha Wakiiladu ku qabsoomi weydo duruufo adag awgeed, Golaha hore ayaa xilka sii haynaya inta ay ka dhamaanayso duruuftaasi, lagana dooranayo Gole cusub. Duruufaha adagi waa: dagaal baahsan, xasilooni darro gudaha ah, aafo dabiici ah oo culus sida dhul gariir, cudurrada faafa, abaaro culus; waxaana qiimaynaya kana go'aan gaadhaya Golaha Guurtida ka dib marka Golaha Xukummaddu sidaa soo jeediyo.'

**Maxkamada Dastuuriga ahi waxa ay soo saartay Qaraarkan Fasiraadda ah ee soo socda:**

- Waxa ay Go'aamisay Maxkamaddu ku dhaqanka xilliga qabsoomida doorashada Madaxweynaha, Madaxweyne Ku Xigeenka iyo Golaha Wakiilada in uu noqdo sida ku cad Faqradda B, Qaybteeda 5aad ee Go'aanka Guurtida kuna beegan bil ka hor dhamaadka muddada xilka loo kordhiyay Madaxeynaha, Madaxweyne ku Xigeenka iyo Golaha Wakiilada JSL oo ku dhamaanaya 27/4/2017, si waafaqsan Qod. 83, Faqrada 2aad[9] iyo Qod.42aad Faqrada 2aad[10] iyo 3aad[11] ee Dastuurka JSL.
- Waxa ay Maxkamaddu laashay heshiiska Saddexda Xibsi Qaran ee KULMIYE, WADDANI IYO UCID ee ku taariikhaysan 27/05/2015 mana laha wax dhaqan-gal sharci ah maadaama Golaha Guurtidu aanay aqbalin soojeedintii Xisbiyada si wax kabadal iyo kaabid loogu sameeyo Go'aanka mudo kordhinta Golaha Guurtida ee ku taariikhaysnaa 11/05/2015.
- Waxa ay Go'aamisay Maxkamaddu in maalinta Doorashada Madaxweynaha, Madaxweyne ku Xigeenka iyo Golaha Wakiiladu noqoto 28/03/2017 kuna beegan Bil ka hor dhamaadka Mudada xilka loo kordhiyay oo ah 27/04/2017. Waana in si rasmi ah u soo cayinto Gudidda Dooraashooyinka Qaranku isla markaana waa in Madaxweynuhu ku soo saaro Degreeto sida uu dhigaayo Qod. 8aad ee Xeer Lr/20/2001[12].
- Waxay Go'aamisay Maxkamaddu in mudo Xileedka 5 (shanta) sano ee ay doorasho ku yimaaddaan Madaxweyenaha, Madaxweyne Ku Xigeenka, Golaha Wakiilada iyo Muddada uu Kordhiyo Golaha Guurtidu marka ay 5ta sano ee muddo xileedka doorasho ay ku yimaadaan dhamaato si waafaqsansan Qod. 83aad Faqradiisa 5aad iyo Qod. 42aad Faqradiisa 3aad ee Dastuurka JSL ay isku mid yihiin, leeyihiina dhaqan-gal sharci oo isku mid ah.
- Qaraarkan fasiraadda ah waxa ay Maxkamaddu soo saartay maanta oo taariikhdu tahay 18/08/2015.

Waxa soo saaray qaraarkan fasiraadda ah garsoorayaasha kala ah:

**Aadam Xaaji-Cali Axmed Gudoomiye** ________________
**Maxamed Cumar Geelle Xubin** ________________
**Cabdiqadir Axmed Maxamuud Xubin** ________________
**Maxamed Faarax Siciid Xubin** ________________
**Axmed Diiriye Qaalib Xubin** ________________
**Cali-Shucayb Sh. Ibraahim Nuur Xubin** ________________
**Cabdiraxman Jaamac Hayaan Xubin** ________________
**Cabdillahi Cabdi Aadan Xubin** ________________
**Yaxye Cali Idiris Xubin** ________________
**Cabdiraxman Xuseen Caynaan Xubin** ________________

---

[9] Qod. 83(2) ee Distoorka:
'2. Doorashada Madaxweynaha iyo Ku-xigeenka Madaxweynaha, oo isku mar loo codaynayo, kuna salaysan habka u codaynta liistada, waxa Ia qaban doonaa bil ka hor dhammaadka muddada xilka Madaxweynaha hore.'

[10] Qod. 42(2) ee Distoorka:
'2. Madaxweynaha ayaa ku dhawaaqaya doorashada Golaha cusub bil ka hor dhammaadka muddada Golaha hore.'

[11] Qod 42(3) - kor eeg tilamaan hoosaadka 8aad.

[12] Qod. 8aad ee Xeerka Doorashooyinka M/weynaha iyo Golayaasha Deegaanka – Xeer Lr. 20/2001:
'Qod 8aad: Wakhtiga qabashada doorashooyinka
Komishanka ayaa cayimaya taariikhaha la qabanayo doorashooyinka si waafaqsan Dastuurka, waxanay ku soo bixi doontaa Degreeto Madaxweyne.'

**Cabdiraxman Xassan Nuur Xubin** ________________
**Sahrah Ismaciil Cabdillahi Kaaliye Sare** ________________

**LIFAAQYADA QORAALKAN EE AAN KU DARREY – *Tifatire (Editor)***

***Lifaaqa 1aad:*** *Warqada Madaxweynaha JSL kuna ee Codisaga Fasiraad*

**REPUBLIC OF SOMALILAND**
**THE PRESIDENT**

REF: JSLJMD/100-3450/082015 DATE: 08/08/2015

| | |
|---|---|
| Ku: Maxkamada Dastuuriga aj ee Jamhuuriyadda Somaliland | Hargeysa |
| Og: Komishanka Doorashootinka Qaranka | Hargeysa |
| Og: Gudoomiyaasha Xisbiyada Qaranka | Hargeysa |
| Og: Golaha Wakiilada Jamhuuriyadda Somaliland | Hargeysa |
| Og: Golaha Guurtida Jamhuuriyadda Somaliland | Hargeysa |

Ujeeddo: Codsi Fasiraad

Anniga oo tixraacaya:

1. Go'aanka Golaha Guurtida oo summaddisu tahay G/G/JSL/82/06/2015 oo ku taariikhaysan 14/05/2015, Faqraddiisa B, Qaybta 5aad ee qoraalkan ku lifaaqan oo u dhigan "Doorashadda Madaxtooyada iyo Golaha Wakiiladdu waxay qabsoomayaan isla hal waqti, ahna bil ka hor dhammadka muddo xilleedka loo kordhiyey, oo waafaqsan Qodobka 42aad iyo 83aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland".

2. Heshiiska Saddexda Xisbi Qaran (UCID, WADDANI iyo KULMIYE), Qodobka 3aad oo u dhigan "waxay saddexda Xisbi Qaran ee UCID, WADDANI iyo KULMIYE ku talinayaan in doorashooyinku ku qabsoomaan badhtamaha bisha Laba iyo Tobnaad 2016, Iyada oo Komishanka Doorashooyinka ay soo jeedin doonaan maalinta qabsoomayso doorashooyinka iyo Qodobka 4aad ee isla heshiiska oo u dhigan "maadaama saddexda Xisbi Qaran ka heshiiyeen wakhtiga doorashooyinka waa in Komishanka Doorashooyinka Qaranku soo jeediyaan maalinta qabsoomida doorashada, isla markaana waxaanu soo jeedinaynaa in Madaxweynuhu dogreetto ku ansixiyo maalinta Doorashada".

3. Isla markaana tixgelinaya mudnaanta ay leedahay in la soo afjaro khilaafka siyaasaddeed ee la xidhiidha xilliga qabashada doorashada Madaxtooyada iyo Golaha Wakiilada.

Waxaan Maxkamadda sharafta leh halkan ugu soo gudbinayaa codsigsan ku saabsan fasiraada ku dhaqanka Qodobbada 3aad iyo 4aad ee heshiiska Xisbiyada iyo Faqradda B, Qaybteeda 5aad ee go'aanka Guurtida oo mid walba gaarkiisa u tilmaanayo xilliga qabsoomidda Madaxtooyada iyo Golaha Wakiilada.

Alla Mahad Leh

Axmed Maxamad Silanyo
Madaxweynaha Jamhhuriyadda Somaliland

---

***Lifaaqa 2aad:*** *Go'aanka Golaha Guurtida* (*Xigasho: http://guurti.com/?p=410*)

*Ref/G/G/JSL/Go'aan Lambar 04/05/2015* *Taariikh: 11/05/2015*

**Go'aan Gole ee Muddo kordhinta xilka Madaxwaynaha ,ku- xigeenka Madaxwaynaha iyo Golayaasha(Baarlamaan-Wakiiladda iyo Guurtidda)**

**Golaha Guurtidda JSL , ayaa isagoo tixraacayay warqada Madaxwaynaha JSL** ee **LrJSL/M/GG/81/2-3218/04/2015 ee25/04/2015, kuna saabsanayd nuxur ahaan ka waajibaad qaadashada dibu- dhaca ku yimid doorashadii Madaxtooyada iyo Golaha Wakiiladda, kuna lifaaqnayd warqaddii koomishanka doorashooyinka qaranka,** ayaa gudo galay muddo korodhsiimada .

Si Goluhu uga guto xilka kaga aadan, ayuu shir- Gudoonka **Golaha Guurtidu** u magacaabay guddi ka koobnayd **30 xubnood,** oo kala ahaa **28 mudane, Xoghayaha Guud ee Golaha iyo lataliyaha sharciga 30/04/2015, Goluhuna** ansixiyay kuna ansixiyay cod loo dhana(Unanimous ) .

Guddiggu fadhigoodii ugu horeeyay oo qabsoomay **3/05/2015** waxay ku dajisteen qorshe hawleedkoodii ay ku shaqayn lahaayeen , iyado qoraalo kala gaar –gaar ah loo kala gudbiyay **saddexda xisbi qaran iyo koomishanka doorashooyinka ,** si loo dhagaysto aragtiyohooga kala duwan ee ay ka qabaan dib-udhaca doorashoyinka ku yimid iyo wakhtiga ku haboon ee ay u qabsoomi karaan si sharciga waafaqsan .

Kullankii ugu horeeyay wuxuu Guddigu ka dhagaystay si kala gaar-gaar ah labadda Xisbi ee kala ah **UCID iyo WADDANI 05/05/2015.**

Sidoo kale waxay Guddigu **kullankooddii labaad-(2aad)** la kala yeesheen **xisbiga kulmiye iyo Koomishanka Doorashooyinka qaranka(KDQ) 06/05/2015.**

Kullamaddaasi waxa lagu dhagaysanayay araa'da ay qabaan iyo wixii tallooyin ah ee ay soo jeedinayeen . Dhinaca kale xubnaha Guddiggu waxay caddaymo iyo su,aalaba ku waydiiyeen Guddigga Doorashooyinka Qaranka . caddaymahaasi iyo su'aalahaasiba waxay ahaayeen qaar dhinacyo badan oo kala duwan taabanayay.

**Ugu dambayntii Guddiggu** waxay tallo soo- jeedin dambe ka dhagaysteen **Xisbiyada Qaranka 09/05/2015,** taasi oo ay ku kordhinayeen tallo soo-jeedimahoogii hore .

**Guddiggu** dood iyo falanqayn ka dib waxay qiimayn mugleh oo ballaadhan ku sammeeyeen xaalaadka guud iyo xaqiiqooyinka dhabta ah ee ka jira dalka.

**Dhinaca kale waxay Guddiggu** diirada ku saareen , lagama maarmaana u arkeen in Diwaan-galinta muwaadinka , codbixiyayaasha iyo doorashooyinkuba si xor ah , xalaal ah oo nabadgalyo ku dheehantahay uga wada qabsoomaan dhammaanba dalka , gaar ahaana Gobollada iyo Degmooyinka Bariga ,iyado la ilaalinayo midnimadda iyo isu-dhamaashaha dhul ahaaneed ee JSL .

Guddiggu waxay yaqiinsadeen inay jiraan fara-galino dibadeed oo lagu kala qaybinayo, dad ahaan iyo dhul ahaanba **JSL**, taasina ay ka soo horjeedo jiritaanka iyo midnimadda ummadda Somaliland , sida ku cad Qoddobka **38aad, farqadiisa 4aad, xarafkiisa (b) ee Dastuurka JSL .**

**Guddiggu waxay is-tuseen** baahida loo qabo **xoojinta amniga** Gobolladda iyo Degmooyinka Bariga, iyo isla-marahaantana xal u helidda wixi tabashooyin iyo khilaafaad jira, taasi oo ubaahan wakhti lagaga bogan karo suullinta arrimahaasi , iyadoo la–isla kaashanayo Dawlad iyo shacbiba .

**Waxa kale oo Guddiggu**, dood iyo falanqayn dheer ka dib , garwaaqsadeen inay jiraan qabyooyin dhinaca shuruucda ah, oon la'aantood la mudayn Karin , lana qaban Karin doorashada.
Guddiggu waxay intaasi ku dareen xaalada cimmilladda ee dhinaca xeebaha iyo wakhtiga ku habboon inay doorashooyinku ka qabsoomaan .

**Haddaba Golaha Guurtidu,**

**Markii** uu dhagaystay warbixintii Guddigga oo ay ku ladhnaayeen fikradihii, aaraadii, iyo tallooyinkii seddexda xisbi qaran iyo komishanka doorashooyinka;

**Markii** uu qiimeeyey xaaladka , iyo duruufaha ka jira Gobolladda iyo Degmooyinka Bariga iyo guud ahaan ba dalka **JSL**;

**Markii** uu lagama-maarmaan u arkay in ay ka suurto–galaan Diwaan-gelinta muwaadinka iyo cod-bixiyeyaashu dhammaanba dalka **JSL**, si ay u suganto is-raacsananta dhul ahaaneed iyo dad ahaaneedba ee Dastuurku waajibiyay ;

**Markii** uu yaqiinsaday in go'aankii ay ku cayimeen Koomishanku wakhtiga doorashadu u ahaa mid baalmarsan, waa faqsanayna Dastuurka iyo shuruucda dalka, iyago sammeeyay muddo korodhsiimo anay awood sharciyeed u lahayn ;

**Markii** ay arkeen in xeerkii hore ee doorashada ee Golaha wakiiladu u ku dhaqankiisu ku ekaa doorashaddii hore oo kaliya , illaa haddana anu jirin xeer u diyar ah doorashada Golaha Wakiiladda, kaasi oo u baahan wakhti, wada-hadal, is-qancin, iyo isu-tanaasul dhinaca saami-qaybsiga oo hore moran uga taagnaa, illaa haddana u ka taagan yahay;

**Markii** uu qiimeeyay xaaladka cimmilladda ee degmooyinka Xeebaha dalka JSL iyo wakhtiga ku haboon inay doorashadu ka qabsoonto ;

**Markii** uu si mugleh u qiimeeyay xaalaadka dhaqan/dhaqaale bulsho, iyo nabadgalyaba, guud ahaanba , gaar ahaana saamaynta dhaqaale ee colaadda ka oogan gacanka cadmeed ay ku yeellatay ganacsigii Somaliland; Iyado laga taxadirayo, dib- u dhac dambe oo ku yimaada Doorashooyinkan iyo mudo kordhin soo noq-noqota Iyo dhammaystir la'aan qabyooyinka taagan ;

**Marku** arkay Qoddobka 42aad faqradiisa seddexaad ee Dastuurka Jamhuuriyada somaliland ;

**Marku** arkay Qodobka 83aad faqradiisa 3aad iyo 5aad e Dastuurka dalka Jamhuuriyadda Somaliland;

**Isago** ka duullaya , tix galiyeyna , kuna go'aan qaatay dhammaanba asbaabaha kor ku sheegan, kuna cad;

**Wuxuu soo saaray Go'aamaddani:**

1. **Muddo korodhsiimooyin**

**1- Waxa la-laalay muddada doorasho ee ku cayiman warqadda lambar KDQ/XK/406/2015 ee 20/04/2015,** kana soo baxday xafiiska koomishanka Doorashooyinka Qaranka, madama anay waafaqsanayn xeerka doorashada lambar **20/2001, qoddobkiisa 8aad** oo u dhigan nuxur ahaan "in anay koomishanku cayimi Karin muddo/maalin doorasho oo ka baxsan dhammaadka **muddo xileedka Madaxwaynaha**, **ku xigeenka iyo Golaha Wakiiladdaba**,'' sido kalana anay waafaqsanayn **qoddobada 42aad iyo 83aad ee Dastuurka JSL .**

**2- Waxa muddo xileedkii Madaxwaynaha iyo ku xigeenka Madaxwaynaha oo ku eg 27/7/2015, lagu sammeeyay korodhsiimo ka bilaabmaysa 28/7/2015 illa 27/4/2017.**

**3- Golaha Wakiiladda oo dhammaadka muddo xileedkoodu ku egyahay 27/7/2015, lagu sammeeyay muddo korodhsiimo ka bilaabmaysa 28/7/2015 illa 27/4/2017.**

**4– Muddo xileedka Golaha Guurtiddu** wuxu noqonayaa hal sano ka dib (**one year after)** dhammaadka muddo xileedka **Golaha wakiiladda** oo noqonaya **27/4/2017,** sida waafaqsan ama ku cadba go'aanka lambar **GW/KF-19/245/2003** ee **29/03/2003,** una dhigan "in muddada xilka **Golaha Guurtiddu** markastaba hal sano ka dambayso taariikhda dhammaadka muddada xilka Golaha wakiiladda " .

**5- Doorashada Maddaxtooyada iyo Golaha Wakiiladdu** waxay qabsoomayaan isla hal wakhti, ahna bil ka hor dhammaadka muddo xileedka loo kordhiyay , oo **waafaqsan qoddobadda 42aad iyo 83aad ee Dastuurka Dalka Jamhuuriyada Somaliland .**

**B- Wajibadka la kala qabanayo, la wada qabanayo iyo hawlaha la dhammaystirayo**

- Iyadoo xukuumaddu horumuud ka ah, waa in si deg-deg ah qorshe dhammaystiran oo iskaabaya ( comprehensive and special programme ) oo qaran lagu wajaha Gobolada iyo Degmooyinka Barriga , oo laga taabo- galiyaa maamul adag iyo amni, si looga suurto- galiyo diwaangelin muwaadin , cod-bixiye iyo doorashaba.
  Sidoo kalena loo sammeeyaa Barnaamij hawleed u gaar ah , oo laga wada qayb – galayo Goleyaal ahaan, Xisbiyo Qaran, koomishan doorasho, waxgaradka bulshada qaybahooga kala duwan iyo shacbiba .

- Qabyooyinka dhinaca xeerarka Goleyaasha (Wakiiladda iyo Guurtiddaba) iyado xukuumaddu ku hoggaaminaysa waa in si wada jir ah oo xil-kasnimo ku jirto loo dhammaystiraa , qorshe deg-deg ahna laga yeesha . waajibaad gudasho la'aan ayay

noqonaysaa haddii aan loo qalab qaadanin dhammaystirka qabyooyinka dhinaca shuruucda.

- Golaha Guurtidda waxa ku waajib ah isagoo gacan-siinaya xukuumadda inuu ka qayb qaato iskuna diyaariyo adkaynta nabadgalyada iyo wacyi-gelinta bulshadda qaybaheeda kala duwan.

- Golaha wakiiladda waxa ku waajib ah in uu meel-mariyo qaybna ka qaato hindise sharciyeedyada qaranku u bahan yahay si fir-fircoon oo xilkasnimo ku jirtana u gutaan waajibaadkooda Dastuuriga ah .

- Koomishanka Doorashooyinka Qaranka waxa waajib ku ah in ay ku tallo –galaan siddi Degmo kasta iyo Gobol kasta looga hirgalin lahaa diwaan-gelin muwaadin , codbixin iyo doorashaba.

- Koomishanka Doorashoyinka qaranku , waa in ay ku tallaabsadaan barnaamij wax ku ool ah oo horseedaya doorashooyin xor iyo xalaal ah, qof kastaana ku dhiiban karo hal cod oo keliya, isla -marahaan –taana siiyaan muwaadiniinta isdiwaan-gelinaysa wakhti ku filan.

- Koomishanka waxa waajib ku ah ku dhaqanka shuruucda iyo Dastuurka dalka JSL.

- Xisbiyada qaranka waxa waajib ku ah in ay la yimadan Barnaamijyo siyaasadeed oo bulshadda ka gudbinaya caqabadaha kala duwan ee haysta ee ragaadiyay horu-markooda, kana waantoobaan wixii bulshadda iska horkeenaya ee dibu-dhaca ku keenaya.

Ugu dambayntii Goluhu wuxuu baaq u soo jeedinaya ummadda reer Somaliland Guda & Dibadda, waxayna ka codsanayaan kuna adkaynayaan in taabogalinta iyo meelmarinta himmilooyinka Qaranka meel looga soo wada jeesto yar iyo waynba.

Dhinaca kalana beesha caalamka waxaan u shegayna in qarankani iyo ummaddiisuba u baahan tahay tageeradooda, balse teegaradoodu anay noqon mid ka soo horjeeda maslaxada, danta, rabintaanka, doonista shacbiga iyo jiritaanka madax-bananidda JSL.

Go'aamadani waxaa lagu ansixiyayay oo ogoladay 72 iyado tirada kooramku ahayd 77 waxa diiday 4 waxaa ka aamusay 0 Gudoomiyuhuna ma uu coddayn.

**NB** waxaa ku lifaaqan halkani liistadii Guddigga xubnihii madasha fadhiga ka qayb-galay.

**Allaa Mahad leh**

**Saxeexa Shir/Gudoonka**
**1-Sulaymaan Maxamuud Aadan Guddoomiyah G/Guurtidda JSL**

____________________

**2- Siciid Jaamac Cali Guddoomiye ku-xigeenka 1aad G/G JSL**

____________________

**3- C/raxmaan Sh. Yuusuf Sh. Madar Guddoomiye ku-xigeenka 2aad ee G/G**

____________________

**4- C/laahi Ibraahim Habane Xoghayha Guud ee G/Guurtidda JSL**

____________________

---

***Lifaaqa 3aad:*** *Heshiiska Saddexda Xisbi Qaran ee KULMIYE, WADANI iyo UCID ee taariikheysan 27/05/2015*

**HESHIIS SADDEXDA XISBI QARAN KULMIYE, WADDANI IYO UCID**
**Tarr: 27/05/2015**

Sidaad la socataan gogoshii wada tashiga Axsaabta Qaranka ee uu Madaxwynuhu fidiyay isla markaasna uu Madaxweyne Ku-xigeenku hogaaminaayay, ee bilaabmay 20/5/2015, waxaanu yeelannay saddex kulan oo aanu ku gorfaynaynay kuna falanqaynaynay sidii mawqif midaysan looga yeelan lahaa aragtiyihii kala duwanaa ee ka dhashay go'aankii muddo kordhinta Doorashooyinka ee Golaha Guurtida, dood dheer iyo falanqayn badan ka dib, waxa ay Axsaabta Qaranku ku heshiiyeen isla waafaqeena in doorashooyinku ay qabsoomaan dabayaaqada sannadka 2016-ka Haddi Ilaahay Edmo, intaas ka dib waxa la soo jeediyay go'aankaas laysla qaatay in ay fuuliyaan Hay'adaha Dastuuriga ah ee ay khusayso arrinta si ay u noqoto go'aan Qaran ahaan loo wada dhan yahy.

Sidaasi daaraadeed, waxa ay Saddexda Xisbi ee UCID, WADDANI iyo KULMIYE ay wada qaateen go'aamadan:

1. Waxa aanu ixtiraamaynaa go'aankii Golaha Guurtida ee kordhinta muddo xileedka Madaxweynaha, Madaxweyne Ku-Xigeenka iyo Golaha Wakiilada maadaama Goluhu uu yahay Gole Dastuuriya.

2. In Doorashooyinka Madaxtooyada iyo Golaha Wakiiladaba ay qabsoomaaan Bilsha December 2016.

3. Waxa ay Saddexada Xisbi Qaran ee UCID, WADANI Iyo KULMIYE ku talinayaan in doorashooyinku ku qabsoomaan badhtamaha bisha Laba iyo Tobnaad 2016, iyada oo Kominshanka Doorashooyinku ay soo jeedin doonaan maalinta qabsoomayso doorashooyinku.

4. Maadaama ay Saddexada Xisbi Qaran ku heshiiyeen wakhtiga doorashooyinka waa in Komishanka Doorashooyinka Qarankuna soo jeediyaan maalinta qabsoomida Doorashada isla markaasna waxaanu u soo jeedinaynaa in uu Madaxweynuhu digreeto ku ansixiyo maalinta Doorashada.

WABILLAHI TAWFIIQ

| | | |
|---|---|---|
| Feysal Cali Waraabe | Muuse Biixi Cabdi | Cabdiraxmaan Maxamed Cabdillahi |
| Gudd. Xisbiga UCID | Gudd. Xisbiga Kulmiye | Gudd. Xisbiga Waddani |
| ________________ | ________________ | ________________ |

Gole Joog
Eng. Abdirahman Abdilaahi Isaaciil (Saylici)
(Madaxweyne ku xigeenka Jam. S/Land)